



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS

Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 7aad	Kulanka: 1aad
Taariikhda: 04/10/2025	Goobta fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu furmay: 10:50 AM	Saacadda uu xirmay: 11:30 AM
Shir guddoonka fadhiga: Senator Cabdullahi Cali Xirsi (Timacade) Guddoomiye ku xigeenka labaad Golaha Aqalka Sare.	Guntanka Kulanka: 31 Senator
Martida Kulanka: - Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arimaha Dastuurka XFS Mudane Xasan Macalin Maxamuud. - Wasiirka Arimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiinta XFS Mudane Cali Yuusuf Cali (Xoosh)	Ajandayaasha Kulanka: - Akhriinta Ayadaha Qur'aanka. - Ansaxinta ajendaha. - Ansaxinta Habdhowre ku xigenka - Akhrinta 1^{aad} ee Hindise sharciyeedka Barakacayaasha Gudaha. - Akhrinta 1^{aad} ee Hindise sharciyeedka Cadaalada Da'yarta Soomaaliyeed. - IWK.

Furitaanka Kulanka:

Kulanka ayaa lagu daahfuray Aayadaha Qur'aanka Kariimka ee uu Akhriyay Sen Xuseen Maxamed Daahir.

Ansixinta Ajandayaasha Kulanka:

Guddoomiye ku xigeenka labaad Golaha Aqalka Sare Sen Cabdullahi Cali Xirsi (Tima cade) ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajandayaasha kulanka, waxaana lagu ansixiyay hab gacan taag ah, codaynta ayaa u dhacday sidaan:

Oggol: 30 Senator

Aamusnaansho: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiye ku xigeenka labaad Golaha Aqalka Sare Sen Cabdullahi Cali Xirsi (Tima cade) ayaa kuso dhaweeyey Wasiirka Arimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisinta XFS Mudane Cali Yuusuf Cali (Xoosh) si uu usoo jeediyo Warbixinta 1aad ee Hindise-sharciyeedka Barakacayaasha Gudaha.

Intaas kaddib, Guddoomiyaha ayaa u yeeray Senatar Zamzam Cabdullahi Axmed si ay Golaha uga hor akhriso mooshin xubaanaha senetarada ay u soo gudbiyeen Guddoonka kaas oo ahaa soo jeedin ku saabsan ansixinta Hab-dhowre Ku-xigeenka. Soojeedinta kadib, Guddoomiyaha ayaa cod u qaaday ansixinta in Senatar Iftin Xasan Iimaan (Baasto) uu buuxiyo xafiska habdhowre ku xigeenka codaynta ayaa u dhacday sidaan:

Oggol: 29 Senator

Aamusnaansho: 1 Senator

Diidmo: Majirin

Dhanka kale, Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha Aqalka Sare Sen Cabdullahi Cali Xirsi (Tima cade) ayaa u yeeray Wasiirka Wasaaradda Cadaalada iyo Arimaha Dastuurka Mudane Xasan Macallin Maxamuud si uu usoo jeediyo warbixinta akhrinta 1aad ee Hindise-Sharciyeedka Cadaalada Da'yarta Soomaaliyeed.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta ajanadaha kulanka.
2. Ansixinta Hab-dhowre Ku-xigeenka Golaha Aqalka Sare, Senatar Iftin Xasan Iimaan (Baasto).
3. Guddoomiye ku xigeenka labaad Golaha Aqalka Sare ayaa faray maamulka Golaha in hindise-sharciyeedyadaan loo gudbiyo Guddiga ku shaqada leh si ay uga gutaan waajibkooda ugana soo diyaariyaan warbixinta akhrinta 2aad.

Ugu dambayntii, Shirgudoonka Shirka Senator Cabdullahi Cali Xirsi (Tima cade) Kusimaha Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa kulanka Soo xiray sacadu markay ahayd **11:30 AM.**

DHAMAAD